

Sharciga 10 Noofember 1961, lamba. 21.

Fududeynta canshuuraha oo loo bixiyo xagga dhisidda Istitaalkacusub, ee Muqdisho iyo qalabka laxiriira.

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Markuu arkay oggolanshaha Golaha Xeerdejinta;

WUXUU GUDDOOMINAYAA SOONA SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1

Soodejinta alaabada iyo qalabka ku jahaysan xagga dhisidda Isbitaalka cusub, ee Muqdisho, ayada oo lagu hirgelinayo maalgelinta Suuqa Midowga Yurub, iyo weliba dib-u-habeynta Kawaanka Dowladda Hoose, ee Muqdisho iyo qalabka qaboojinta iyo qasacadeynta hilbaha iyo weliba kuwa isticmaalka xagga waxyaabaha laga soo saaro, waxaa laga dhaafay canshuurta dekedaha iyo xuquuqda dekedeed ee la xiriirta.

Bursiinadaas waxaa la gaarsiinayaalaa alaabada horey loo soo-dejiyey oo canshuurta laga laalay, iyo weliba alaabada iyo qalabka (saanadda) oo suuqa laga gatay oo, xaggooda, la caddeeyey in xaqiiqo ahaan loo isticmaalay xagga dhismaha iyo dib-u-habeynta dhismooyinka la soo sheegay.

Qod. 2

Waxaa canshuurta diiwaanka iyo canshuurta boollada laga dhaafay xagga dhammaan qoraallada mucaamalaadka ee la xiriira dhismaha iyo dib-u-habeynta dhismooyinka lagu tilmaamay qodobka hore.

Bursiinadaas waxaa loo fidinayaalaa qoraallada mucaamalo, oo ay ku jiraan kuwa qandaraas-hoosaadka oo horey loo diiwaangeliyey, ayada oo la socoto ballan hore, kuwaas oo aan laga bixin canshuurta diiwaanka iyo canshuurta boollada.

Qod. 3

Sharcigan waxa uu dhaqangelayaa malinta ka dambeysa taariikhda lagu nashriyo Faafinta Rasmiga.

Sharcigan waxaa lagelinayaalaa Ururinta Rasmiga, ee Sharchiyada.

Qof kasta ku leh waa ku khasab in uu dhowro una dhowro sida sharci ka mida sharcida Jamhuuriyadda.

Taariikhda marka ay Muqdisho ka tahay 10 Noofember 1961.

Adan Cabdulle Cusmaan

Wasiirka Kowaad

Cabdirashiid Cali Sharmarke

Wasiirka Lacagta

Cabdulqaadir Maxamed Aadan